

Miyay saameyn kugu yeeshaan Isbeddellada Cusub ee Gargaarka Cuntada ee Federaalka?

Isbeddellada ku yimaada u-qalmidda ama xaq-u-yeelashada Barnaamijka Kaalmada Nafaqada Dheeriga ah ee Federaalka (SNAP) ee ku saleysan xaaladda socdaalka

Haddii aad tahay:

Muwaadin Maraykan ah ama Qof Qaran Maraykan ah u dhashey

Dagganaha Sida Joogtada ah u Daggan (Qof Haysta Kaarka Cagaaran "Green Card")

Muhaajirka COFA*

Qof Soo-galooti ah oo Kuuba ama Hayti u Dhashey

- Waxaad weli u qalantaa dheefaha SNAP ee federaalka.

Haddii aad tahay:

Qaxooti, magangalyo-doon ama muhaajir haysta ilaalin bani'aadamnimo

- Waxaad xaq-u-yeellan doontaa dheefo cunto oo uu gobolku maalgeliyo beddelkii dheefaha SNAP ee federaalka.
- Bisha Maajo 2026, DSHS waxay si otomaatig ah kuugu wareejin doontaa dheefaha uu gobolku maalgeliyo.
- Xaddiga dheeftaada isku mid ayay ahaan doontaa.
- Uma baahnid in aad mar kale codsato isbeddelkan awgiisa.

Isbeddellada ku yimid shuruudaha shaqo ee SNAP-ka federaalka

Dadka qaata gargaarka cuntada ee awooda in ay shaqeeyaan oo aysanna ka soo bixin ka dhaafidda waa in ay buuxiyaan shuruudaha shaqo ee waafaqsan sharciga federaalka. Haddii aysan ka soo bixin, waxaa ay kaliya xaq u leeyihiin dheefaha cuntada saddex bilood muddo 36-bilood ah.

Haddii aad tahay:

Qof ay da'diisu ka yar tahay 18 ama ay ka weyn tahay 65

Hinddida Mareykanka ama Alaskaan Dhallad ah

Haweenay uur leh

Qof naafo ah

Qof guriga u jooga ilmo ay da'diisu ka yar tahay 14

- Uma baahnid in aad ka soo baxdo shuruudaha shaqada ee cusub.
- Dheefahaaga cuntada waxaa ay u sii socon doonnaan si caadi ah.

Haddii aad tahay:

Qof askari ama shaqaale dowladeed ahaan jiray

Qof wajahaya guri la'aan

Qof dhallinyaro ah oo da'diisu ay ka yar tahay 24 kaas oo da' ahaan ka baxay daryeelka korsashada

Qof da'diisu u dhaxeeyso 18 ilaa 64 oo aan lahayn qof ku tiirsan oo ay da'diisu ka hooseeyso 14

Qof Aan Naafo Ahayn ama Uur Lahayn

- Waxaad u baahan doontaa in aad buuxiso shuruudaha shaqo si aad xaq ugu sii yeelato dheefahaaga cuntada.
- Dib-u-eegistaada xigta ee xaq-u-yeelashada, waxaad heli doontaa ogeysiis qoraal ah iyo mid afka ah iyo baaritaanka shuruudahaasi shaqada.
- Ma lumin doontid dheefahaaga cuntada ka hor dib-u-eegistaada xaq-u-yeelashada iyo baarista.

Isbeddellada qoysaska helaya Barnaamijka Gargaarka Tamarta Guriga Dakhligiisu-Hooseeyo

Isbeddelka sharciga federaalka ee dhowaan wuxuu meesha ka saarayaa awoodda uu gobolku u leeyahay isticmaalka LIHEAP helaya si qoysaska loo siiyo qiimo dhimista adeegyada ee ugu sarreysa ee qoysaska aan ka mid ahayn xubin waayeel ah (jira 60+) ama naafo ah. Tani waxaa loola jeedaa:

- Dheefahaaga waxaa laga yaabaa in ay hoos u dhacaan.
- Isbeddelkan wuxuu saameyn ku yeellan karaa dheefahaaga bisha Maajo 2026 iyo wixii ka dambeeya.

Maxaad sameyn kartaa haddii aad u maleynayso in isbeddelladan ay kugu dabaqmaan?

- ✓ Buuxi dib-u-eegistaada xaq-u-yeelashada waqtigii loogu talagalay.
- ✓ Waqtigaasi, hubso macluumaadkaagi in uu sax yahay.
- ✓ Su'aalo weyddii: Waxaad Xarunta Xiriirka DSHS ka waci kartaa 877-501-2233 ama booqo [Xafiiska Adeegyada Bulshada ee degaankaaga](#).

Ma u baahan tahay in lagaa caawiyo helidda kheyraadyo badan:

- Waxaad heli kartaa kaydada cuntada degaanka iyo kheyraadyo kale adiga oo wacaya 211 ama booqanaya wa211.org si aad wax kale u oggaato.
- Hagahan [adeegyada qiima-dhimista lagu sameeyay ee DSHS](#) wuxuu leeyahay kheyraadyo iyo adeegyo degaanka ah oo dheeraad ah oo caawimaad u yeellan kara qoyskaaga.



MUHIIM AH:

Haddii hal qof oo ku jira qoyska gargaarka cuntada uusan xaq-u-yeellan, dadka kale ee qoyska waxaa ay sii heli karaan dheefaha cuntada.

*Heshiiska Iskaashiga Xorta ah / Compact of Free Association, ama COFA, muhaajiriin waa dadka ka yimaada Dowladaha Madax-bannaan — Micronesia, Marshall Islands iyo Palau — kuwaas oo fasax gaar ah u haysta in ay ku noolaadaan, ka shaqeystaan iyo in ay wax ku bartaan dalka Mareykanka si waafaqsan Heshiiska Iskaashiga Xorta ah ee loo yaqaanno Compact of Free Association.